



Caymsika caafimaadka

Si aad uaado dhakhatar waxaad u baahatahay inaad iska soo qorto caymis ,sharci ahaanna waa kugu waajib ,qiimaha waxaa kaa bixin doona joobsenterka ama sooshiyaalka



(bangiga)

Dhaqalaaha lagu siiyoiyo mushaarka waxaa la isugu soo diraa wadankan koonto ama akaawnti ,sidaas darteed waa inaad soo furataa bank xisaabeed dookhaada ah



Koorsada is dhexgalka

Si aad luqadda wadankan u barato waxaa lagugu waajibayay inaad koorsa is dhexgak ka soo qeyb qaadato , iskuulo kala duwan oo luqadaha ah ayaa jiro kuwaas ayaad iska soo qori kartaa



Iskuulka iyo xanaanada caruurta

Inaad ilmaha ka soo qorto xanaanada caruurta ama iskullka waa tilaabo muhiim ah,ilmaha laga bilaabo 3 jir xaq ayay u leeyihiin in ay boos ka helaan xanaanada ,kuwa 6 jirka ahna waa waajib in iskuul laga soo qoraa, arrintani ma aha mid iskeed isaga imaayso waa in toos looga soo qoro iskuulka.



(sanduuqa qoyska)

Sanduuqa qoyska waxaad ka codsan kataa lacagta loogu talo galay ilmaha



Waxyabo dheeraad ah

Meelo badan waxaa ka jiro meelo dharka laga bixiyo ama qiimo jabon lagu iibiyio iyo meelo laga bixiyo cunto bilaash ah ama qiimo aad u yar aad ku iibsan kartid



Caawin iyo talo bixin

Dadka wadankan ku cusub waxaa jiro xarumo dadka lagala taliyo , meelaha talada laga siiyo dadka soo galootiga ah ee qaangaarka ah ayaad cawimaad weydiisan kartaa , 12 ilaa 27 waxa cawimaad ka codsan karaan meelaha dhilinta laga taliyo , waxaa ka jiro wadankan ururo samafal sida ,AWO, caritas, deutscher paritätischer wohlverband ,Diakonie,iyo xarunta ururka sama falaka ee yuhudda,waxaa kale oo cawimaad ka dalban kartaa dadka sida bilaashaka ah ama lacag la,aanta ah ku caawiyo ee loo yaqaano ehrenamtlich



Friedland



JRS România



CPR



REFUGEE COUNCIL



IOM  
UN MIGRATION

# Imaatinkaada jarmalka



Tilaabooyinka hore:  
Ku saabsan dadka dib  
u dajinta ama bani  
adamnimada ku yimid

Gefördert vom:



Bundesministerium  
für Familie, Senioren, Frauen  
und Jugend

Caritasstelle im Grenzdurchgangslager Friedland  
Heimkehrerstraße 11, 37133 Friedland

Telefon 05504 261

[www.caritasfriedland.de](http://www.caritasfriedland.de)

Maxaa waajib ah inaad sameyso

## Tilaabada koowaad ee wadankan jarmalka



Waxaan aaday oo aan iska soo diiwangeliyay xafiiska diiwangelinta kana soo qaataay cadeynta is diiwaan gelinta



Waxaan aaday xafiiska laga maamulo ajaanibta ama shisheeyaha halkaas oo aan ka codsaday deganaashaha



Waxaan aaday joobsenterka ama sooshiyaalka oo aan ka soo codsaday gargaarka bulshada ,Waxaan aaday bankiga oo aan ka soo furtay koonto xisaabeed



Waxaan iska soo diiwaan geliyay caymiska caafimaadka , halkaas oo aan ka soo codsaday kaarka caafimaadka



Waxaan aaday iskuulka luqadda lagu barto oo aan iska soo diiwaan geliyay koorsada is dhexgalka



Caruurteyda waxaan ka soo diiwaan geliyay xanaanada caruurta iyo iskuulka



Waxaan ka codsaday sanduuqa qoyska lacagta caruurta



Hay,adda ajaanibta ama shisheeyaha

Degeanaasha elektaroonika ah waa inaad ka codsataa xarunta looga arrimyo ajaanibta ee Ausländerbehörde waxa uu qaadan wakhti inta uu kaaga soo baxayo

Ballan walba oo aad tagaysid waxaad fiican waraaqahaada kuwii aad banaanka kal timid iyo kuwa wadanka lagaa siiyayba inaad wadato . waraaqo badan oo muhiim ah ayaa kuugu jiro galka ama bacda ay ku sii siisay IOM iyo baqshaddii lagaa soo siiyay Friedland

Dukumintiyada qaar waa muhiim xafiisyo kale ayaa xili danbe uga baahan doontaa oo lagu weydiin doonaa,billawga hore waxaad yeelan doontaa ballamo badan oo kala duwan lagana yaabo inaad dareento culys badan , culeys xagga luqada ah ayaa macquul inaad si sax u ah wax u fahmi weyso , inta bdan waa culeys, laakiin kaligaa

Buugaan yarka ah waxa uukuu cadeynayaatillaabooyinka oogu horreeyso ee meesha aad ku cusubtahay ee aad degayso ,waxaad marka oogu horeeyso yeelan doontaa ballamo badan ,waxaad kale oo aad codsan doontaa dalabyo kala duwan waxaadna buuxin doontaa waraaqo badan oo aad saxiixi doontaa .meelba meesha kale si ka duwan ayaa wax loo habeeyaa mararka qaar ballanta waaba la sii qabtay oo waa lagu raacayaa,mararka qaarna adiga ayaa isdabarayo oo ballantaada dhamaysanayo, waa muhiin ballanta inaad wakhtieeda ku tagto ,meelaha qaar waxaa joogo afceliyaal ama tarjumaano meelaha qaar ma laha.ballamada qaar waxaa laguugu soo dirayaa boosto , fadlan qoraal sax ah uu muuqdo oo magacaada ah ku dhaji sanduuqa waraaqaha kuugu soo dhacayaan , haddii ay tahay meel si wada jir ah loogu noolyahay fadlan ogoow meesha ay waraaqaha kuusu soo dhacayaan iyo sida ay kugu soo gaarayaan



Xafiiska isdiiwaangelinta

Xafiiska is diiwaangelinta waa in ay iska soo qoraan dadka oo dhan , sida qof cusub oo kale, waxa ayna halkaan ka soo qaadanayaan cadeynta is diiwaangelinta



(xarumaha adeegga bulshada)

Xarumaha adeegga bulshada ee joobsenterka ama sooshiyaalka waxaa laga codsadaa garaarka ama dhaqaalah nolosha , joobsenterka waxaa wax ka codsada dadka shaqo, la,aanta ah oo dhan ,haddii aad gaarto da, cayiman ama cimri sida dadka waawayen ama aadan shaqayn karin waxaad dhaqaale ka codsan kartaa sooshiyaalka xarunta daryeelka bulshada